

## COVID-19

### Ammaanka iyo caafimaadka shaqo: Macluumaadka loogu talagalay shaqaalaha

Sida waafaqsan shuruucda Qaabka Ammaanka iyo Caafimaadka Shaqo, loo shaqeeyahaaga oo leh waajibaadka daryeel ee ammaanka iyo caafimaadka shaqaalaha iyo kuwa kale ee jooga goobta shaqada.

#### Maxay shaqaaluhu u baahan yihiin inay sameeyaan?

Waajib ayaa kaa saaran inaad ka qaadata taxadar macquul ah oo ku saabsan ammaankaaga iyo caafimaadkaaga, iyo inaad si xun u saameyn ammaanka iyo caafimaadka kuwa kale.

Waxaad u baahan tahay inaad raacdid wixii tilmaamo ama qorshayaal macquul ah ee loo shaqeeyahaagu uu dejiyey isagoo ka jawaabaya COVID-19. Tan waxaa ku jira haddii aad ka shaqeynaysid goob kale, sida ka shaqeynta guriga.

#### Maxay u baahan yihiin shaqaaluhu inay sameeyaan?

Loo shaqeeyahaagu waa inuu gartaa khataraha caafimaadka shaqo iyo ammaan ee ka iman kara fayraska COVID-19 iyo meel alaale meeshii suurtagal ah, waa inaad dhigtaa kontoroolo ku haboon. Waxay u baahan yihiin inay raacaan tilmaamaha dawlada , oo ay ku jiraan dhaqangelinta [physical distancing](#) ku haboon – ku ilaaliyaan shaqaaluhu goobta shaqada ugu yaraan 1.5 mitir inay isu jiraan.

Khataraha fayraska COVID-19 ka imanaya waxay noqon karaan kuwo jireed ama arimo bulshadeed.

Waxa loo shaqeeyahaagu uu sameyn karo si uu ugu maareeyo khatarta aad ku wajaheyso fayraska COVID-9 waxay ku xirnaan doontaa goobtaada shaqo iyo shaqadaad qabato. Loo shaqeeyahaagu waa inuu kaala hadlaa wax ku saabsan waxay qorsheynayaan inay sameeyaan.

Waxay awoodaan inay:

- qorshayaal meel dhigaan layskaga ilaalinayo xiriirka dhow ee dadka u dhaxeeya – ku ilaali qof kasta oo jooga goobta shaqada inay ugu yaraan isu jiraan 1.5 mitir jir ahaan.
- ku dhiirigeli qof kasta oo jooga goobta shaqada inuu ku celceliyo [good hygiene](#) adoo siinaya isticmaalka tasiilaad nadaafadeed oo ku haboon si ay awood ugu siiyaan shaqaalaha inay ku dhaqaan gacmahooda saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 ilbiriqsi, ama ay isticmaalaan jeermis dilaha gacanta oo aalkohool leh
- sii inay helaan qalabka ilaalineed ee shakhsiga
- kordhi nadiifinta goobta shaqada
- xaddid dad kale inay isticmaalaan goobta shaqada
- kuu tilmaamaan inaad ka shaqeyso goob kale, sida gurigaaga – maskaxda ku hey tan waxaa laga yaabaa inay isbedesho, kordhiso ama abuurto khataraha ammaanka iyo caafimaadka shaqada.

#### Maxaan sameeyaa haddii aan u maleynayo inaan qabo COVID-19?

Waa inaad:

- raadsataa caawimaad caafimaad ([seek medical advice](#))
- shaqo ha ahaadin
- u sheeg loo shaqeeyahaaga sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah oo la socodsii haddii xaaladaadu ay isbedesho, tusaale haddii la xaqiijiyoo inaad qabto fayraska

### **Ma joojin karaa shaqada haddii aysan ammaan ahayn?**

Haddii aad wax ka saluugto ammaankaaga, la hadal loo shaqeeyahaaga ama Wakiilka Ammaanka iyo Caafimaadka (HSR).

Xaaladaha qaarkood shaqaaluhu xaq bay u leeyihiin inay joojiyaan ama diidaan sameynta shaqo aan ammaan ahayn. Xuquuqdaan baad leedahay haddii ay jirto khatar daran oo aad gelayso oo aad si macquul ah uga saluugsan tahay caafimaadkaaga iyo ammaankaaga oo khatar islamarkaaba jirta ama dhici karta – tan waxaa ku jiri karta fayraska COVID- 19.

Haddii aad shaqada joojisid sababtoo ah ammaan ma aha, waxaad u baahan tahay inaad loo shaqeeyahaaga ugu sheegto sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah. Ka dibna sidoo kale waa inaad diyaar u tahay inaad ku qabatid shaqo bedel ah oo kugu haboon, sida guriga ka shaqeynta.

### **Wixii macluumaad dheeraad ah**

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ammaanka iyo caafimaadka shaqada, gal [Safe Work Australia website](#)

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan lacag bixintaada iyo lacagta fasax sannadeedka, gal [Fair Work Ombudsman](#)

Wixii ah macluumaadka caafimaadka gal [health.gov.au](#)

Fadlan ogsoonow in la dhaqangeliyey shuruucda Modal WHS dhammaan gobolada marka laga reebo Victoria iyo Western Australia. Macluumaad ka khaaska u ah goobtaada shaqo, fadlan kala xiriir qolada khuseysa ee [WHS regulator in your state or territory](#).